

XUKUUMADDA SOOMAALIYA
Sharciga 8 Jennaayo 1960, lamba. 6 diiwaan
Awood siinta Golaha Sharcidejinta

MAAMULAHA

Marka uu arkay oggolaanshaha Golaha Sharci-dejinta aasaaska;

WAXA UU XEERINAYAA UUNA SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Golaha Sharci-dejinta aasaaska oo la doortay, ayada oo la dabbaqayo sharciga 12 disember 1958 lamba. 26, waxaa la siiyey awood buuxda, ee Gole Xeerdejin, la unkay sí uu dejiyo una soo saaro Dastuurka Soomaaliya.

Qod. 2

Golaha aasaaska waxa uu degsan doonaa xeerarka lagama maarmaanka u ah, xagga hirgelinta (fulinta) sharcigan iyo weliba xeerhoosaadkiisa.

Qod. 3

Go'aan-qaadashada Golaha Sharcidejinta, ee aasaaska, laguma dabbaqayo xeerarka ku xusan qodobbada 5aad iyo 6aad, Amargooyada lamba. 2 ee 5 Janaayo 1956.

Qod. 4

Taariikhda oggolaanshaha Golaha Xeerdejint aasaaska, ee Dastuurka, waxaa góaya oo ku eg jiritaanka golahaas.

Qod. 5

Golaha Xeerdejinta, ha ahaato ka hor amaka dambe hawlaha Golaha aasaasiga, waa sii-wadanayaa hawlahiisa, sí waafaqsan sharciga horey loo soo xigtay, ee 12 Disember 1958, ee lamba. 26.

Qod. 6

Sharciga waxa uu dhaqagelayaa maalinta sharcigaas lagu faafiyo (nashriyo) Faafinta Rasmiga. Sharcigan waxaa la gelinayaa Uruurinta Rasmiga, ee sharciyada, waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga. Nin kasta oo waajib ka saaran yahay in uu dhowro, inta kalana ku khasba in ay u dhowraan sida sharci ka mida shuruucda Soomaaliya.

Lagu sameeyey Muqdisho, maanta oo ah 8 Janaayo 1960.

Maamulaha
Gasbarri

Wasiirka koowaad
Cabdullaahi Ciise Maxamuud